

Taageeridda
horumarka luqadeed
ee cunugga
luqadaha badan

somali

Labo luqadlenimada ama luqado badnaanta



- Labo luqadlenimada ama luqado badnaantu ayaa ka badan hal luqadlenimada.
- Luqado badnaantu ma kordhinayso soo ifbaxa dhibaatooyinka horumarka luqadeed.
- Si kastaba ha ahaatee, ku barbaaridda luqado badnaantu waxay waalidka uga baahnaan kartaa wakhti iyo juhdi badan.
- Waxaa wanaagsan in doorashada luqadda/luqadaha horay loo sii qorsheeyo.
- Kula hadal cunugga luqadda aad si fiican u taqaan (inta badan waa afka hooyo).
- Cunuggu wuxuu fiinshka ku baranayaa xannaanada/dugsiga.
 - Looma baahna in af fiinsh guriga looga hadlo.



Akhrinta buugaagta

- Wadajir wax u akhrintu waxay xoojisaa erayada iyo aqoonta dad la xiriirista cunugga.
- Dooro buugaag ay ku jiraan sawirrada uu cunuggu jecelyahay.
- Afkaaga hooyo ugu sheeg sheeko adigoo isticmaalaya sawiir (Wax dhib ah ma lahan xittaa haddii aanu buuggu ku qornayn afkaaga hooyo).
- Magacow sawirrada.
- La sheekeyso cunugga, weydii waxa sawiirrada ka muuqda iyo waxa buugga dhexdiisa ka dhacaya.
- Weydii waxa uu cunugga sheekada u malaynayo.
- Sheeka-xariirada fiidki waxay noqon kartaa hab wanaagsan oo uu ku dego si uu seexo.
- Cunugga la aad maktabadda.



Nololmaalmeedka wadajirka ah iyo tusaalaha qofka weyn

- Tusaale sii cunugga.
 - Si joogto ah tusaale ahaan ugu celi jawaabaha cunugga, xittaa haddii uu luqad kale kuugu jawaabayo.
- Nololmaalmeedka ayuu cunuggu luqadda ku bartaa.
 - Ka qaybgeli cunugga shaqada guriga (tusaale ahaan cunto-karinta, nadaafadda).
- U sheekee cunugga.
- U sheeg waxa aad samaynayso iyo waxa uu cunuggu samaynay.
 - ” Waxaan hadda miiska saarayaa fargeetooyinka iyo mindiyaha”.
 - ” Si fiican ayaad kabaha u xiratay”.
- Isticmaal magacyada rasmiga ah ee arrimaha.
 - Halkii aad ka dhihi lahayd ”kuwaan xagga gee”, tijaabo in aad dhahdo ”sigsaantan geli selledda ku jirta armaajada dharka”.
- Weydii cunugga akhbaarta maalinlaha ah. Ku dhiirrigeli cunugga ka hadlidda maalintiisa xannaaneed/dugsiga.
 - Waxaad cunugga ka caawin kartaa weydiinta su'aalaha hubsashada ah (kuma, maxay, halkee).
- Dheesha ayuu cunuggu wax ku bartaa.
 - Si fool-ka-fool ah ula dheel cunugga.
- Heesaha iyo hees-carruureedyadu waxay taageeraan horumarka hadalka iyo luqadda.



Wakhtiga shaashadda



- Cunuggu wuxuu isticmaalka luqadda ku bartaa la xiriirista dadka kale ee kama barto shaashadda.
- Shaashad: telefihin, telefoon, tableeti iyo kambuyuutar
- Wakhtiga shaashadda ee talo ahaan loo soojeedinayo:
 - 0–2 sano jirku maba u baahna shaashad
 - 3–5 sano jirka waxaa loo soojeedinayaa ugu badnaan 1 saac maalintii
 - Kuwa kaweyn 6 sano waxaa loo soojeedinayaa ugu badnaan 2 saac maalinti
- Cunuggu waxbuu ka baran karaa shaashadda, laakiin kama baranayo haddii aanu qof weyn kala qaybqaadanayn.
- Haka dhigin luqadda shaashadda lagu daawado af ingiriis, haddii aanu ingiriisku ahayn afka guriga.
- Fiiro u yeelo xittaa wakhtigaaga shaashadda.



Macluumaad dheeraad ah

- Rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka
- Taxanaha Cunuggu wuu baranayaa ee bogga Su'aal wanaagsan ee Ururka Dadweynaha
 - <https://www.hyvakysymys.fi/video/lapsi-oppii-monikielinen-perhe-vuorovaikutus-ja-kielen-oppiminen/>



Soonaha nololwanaagga ee Kanta-Häme
Adeegyada baxnaanada ee carruurta iyo dhallinyarada, teraabiyada hadalka